



U dhaqdhaqaaq

nidaamka waxbarasho ee ilmahaaga marka uu la kulmo caqabadaha maskaxda.

Iskuulku wuxuu noqon karaa wax aad ugu adag ardayda ay soo foodsaarto caqabadaha xanuunka maskaxdu. Adigoo diiradda saaraaya sidii aad u hagaajinlahayd guusha, awoodda iyo nidaaminta ilmahaaga ayaa fure u ah horumarkiisa. Marka sidaa la sameeyo waalidiinta iyo iskuuladu waxay ka caawinayaan inay dhisaan adkaysiga caruurta iyo ugu dambayn sidii ay u gaadhilahaayeen himiladooda fog. Ardaydu waxa sida ugu wanaagsan ay wax u qabtaan, markii ay waalidiinta iyo iskuuladu si joogto ah u wada shaqeeyaan.

Tilmaamahan ayaa kaa caawin doona in aad fahamto nidaamka loo maro waxbarashada iyo in ay waalidiintu helaan xirfado muhiima. Hadafku wuxuu noqon doonaa in aynu abuurno qorshe yaraynaaya caqabadaha isla markaana kor u qaadaaya fursado awoodeed oo ilmuhu adeegsankaro.

Xuquuqda waxbarasho

Ilmo kasta iyo dhalinyarada Canada waxay xaq u leeyihiin waxbarasho, taas oo u damaanad qaadaysa sharciga hadba gobolka uu ku noolyahay. Sharcigu waa mid loo wada simanyahay, siiba kuwa leh duruufaha caafimaad darro ee xagga maskaxda.

Dugsiyada hoose iyo kuwa sare ee ay dawladdu maal galiso waxaa waajib ku ah in ay qaataan talaabooyinkan sida ugu macquulsan si loogu daryeelo baahiya gaarka ah iyadoon loo eegayn luqudda wax barasho ee caruurtaasi.¹

Xeerka sharciga waxbarasho wuxuu siiyaa adeegyo waxbarasho oo gaar ah dhammaan ardayda u baahan, si loogu taageero barnaamijyo iyo adeegyo joogto ah. Tan waxaa ka mid ah barnaamijyada lagu kala soocay fasalka caadiga ah iyo fududeynta lagu qeexay Qorshaha Waxbarashada Shaqsiyeed [(Individual Education Plan (IEP))].

Hadday dhacdo in qof lagu tilmaamo in uu leeyahay dabeecado gaar ah oo la xidhiidha xanuunka maskaxda, guddida dub u eegistu [Identification, Placement, and Review Committee (IPRC)] waa hannaanka kaliya ee ardayga), haddii uu u qalmo loo aqoonsan karo wasaarad ahaan "mid Gaar ah" sidaa daraadeena wuxuu sharcigu siinayaa in uu helo waxbaasho gaar ah.

Sida uu tilmaamayo xeerka 306 ee sharciga waxbarashadu (Education Act), guddiga iskuul kastaa wuxuu u xilsaaranyahay in ay u diyaariyaan waxbarashada gaarka ah ee loo yaqaan (IEP) ardayda loo aqoonsado in ay ka mid noqdaan. Qorshaha waa in dib loo eegaa sannad dugsiyeed kasta si loo ogaado isbaddalada la xidhiidh ardayga.

Habka loogu talo galay caawimaadka dugsiya si loo fahmo baahida ilmaha

Qorshaha Waxbarashada Shaqsiyeed (IEP)

Haddii ilmahaagu wajaho caqabado xagga dugsiya ah, marka ugu horaysaba waa inaad codsato in aad la kulanto macalinka ilmahaaga si aad u ogaato horumarkiisa. Macalinka ilmahaagu waxaa laga yaabaa in uu leeyahay aqoon iyo aragti qiimo leh oo ku saabsan baahida iyo awoodda waxbarasho ee ilmahaaga. Dhanka kale waxaad macalinka la wadaagi kartaa fahamgaaga ku saabsan baahida ilmahaaga. Wada jir waxaad go'aansan kartaan wixii dheeri ah ee ilmahaagu u baahanyey taageero dheeraad ah

oo lagu bixin karo siyaabo kala duwan kana mid tahay 'Qorshaha Waxbarashada Shaqsiya ah' (IEP).

Qorshaha Waxbarashada Shaqsiyeed (IEP) waa qorshe qoran oo qeexaya barnaamijka waxbarashada gaarka ah iyo/ama adeegyada la siiyo arday gaar ah. Waxaa ku jira diiwaankani adeegyo, iyo/ama waxka badal iyo/ama barnaamijyo kale ee lagama maarmaanka u ah ilmaha waxbarashadiisa/eeda.

- Siyaabo badan ayaa Qorshaha Waxbarashada Shaqsiya (IEP) u tahay udub dhexaadka waxbarashada gaarka ah ee iskuulka.
- Ujeedada Qorshaha Waxbarashada Shaqsiya (IEP) waa in la hubiyo in ardayga caqabaduhu haystaan uu awood u yeesho in uu galo manhajka waxbarashada.
- Fasalka caadiga ah adeegyada hoos yimaadda Qorshaha Waxbarashada Shaqsiya (IEP) ah waxaa suurto gal ah waxyaabaha ay ka midka yihiin habka meelaynta sida halka uu fadhiisanayo oo ah meel loogu talo galay si ay u yaraadaan waxyaabihii mashquulinlahaa, wakhti dheeri ah oo la siiyo si uu u guto shaqada loo dhiibay ama uu u helo meeshii deggan ee ilmuhu u baahanyey.
- Dugsiyada qaarkood waxay awoodaan in ay bixiyaan ama siiyaan ilmaha qol u gaar ah si uu ardaygu xawaaraha uu doonaayo ugu shaqeeyo. Waalid ahaan waxaad haysataa macluumaad qiimo leh oo kugu hagaaya qorshan. Waxaad ogtahay xeeladaa farsamo een ka hor shaqayn jirin ama saacadaha iskuulka. La wadaaga wixii aad taqaanaan, waxaad qayb muhiim ah ka tihiiin kooxdane.
- Isbadalka Qorshaha Waxbarashada Shaqsiya (IEP) wuxuu u baahanyey la tashiga waalidiinta.
- Haddi aanad ku raacsanayn Qorshaha Waxbarashada Shaqsiyeed (IEP) waxaa lagama maarmaan ah inaad samaysato ballan si aad ugala xaajooto dareenkaaga. Waxaa muhiim ah in la ogaado nidaamka fududaynta qaarkood in loo dejin doono si caadi ah xataa (ogolaansho la'aan) haddii waalidku diido in uu saxeeexo iyagoon u baahan in ay samaysan codsi kulan ama aan qabsan wax balan ah. Arrimahan aynu soo sheegnay oo layska indha-tiraan xal waara lagama gaadhi karo.
- Haddadan fahmin Qorshaha Waxbarashada Shaqsiya (IEP) looma baahna in aad saxeeexo wax aanad fahmin. Waxaa haboon in aad waydiisato kulan ama qabsato balan, hana ka walaacin in aad waydiiso su'aalo.
- Waa surtogonal in aad ogaato in iskuulku ku siiyo taageero isagoon haysan qiimayn ama xataa baadhitaanka xanuunka maskaxda.

¹ Fadlan la soco: ereyga "caruur" ee kujira buugyarahan waa in loo aqriyaa macno ahaan caruurta iyo qofka dhalinta ah marka laga reebo halka ay ku caddahay in qofka dhalinta yar uu u jeedo ardayda dugsiya sare iyo ka dib.

- Qorshaha Waxbarashada Shaqsiga (IEP) waa mid shaqaynaaya oo dib loo eego marwalba waana mid la waafajinkaro xilli kasta oo lagama maarmaan ah iyadoo lala tashanaayo waalidiinta
- Iskuulku wuxuu soo jeedin karaa in la beddelo fasalka caadiga ah sida jidwalka dabacsan ama maalin iskuul iyadoo la eegaayo sida ugu haboon ee ilmahaaga dani ugu jirto. Tusaale ahaan. 2 saacadood maalintii ama in uu xaadiro maadooyinka qaarkood.
- Qorshaha Waxbarashada Shaqsiga (IEP) sidoo kale waa meel wadhadalka ku saabsan ilmahaaga lagula yeelan karo shaqaalaha.

Guddiga Aqoonsiga Meelaynta iyo Dibu-Eegista (IPRC)

Marka Qorshaha Waxbarashada Shaqsiga (IEP) ama adeegyada hadda jiraa aanay la kulmin baahiyaha ilmahaaga, (IPRC) waa hobsocodka Wasaaradda Waxbarashada ee sharcciga ah si loo garto ardayda xaqa u leh barnaamijka waxbarashada gaarka ah iyo/ma adeegyada gaarka ah. IPRC ayaa ka dhigaysa IEP mid la dhaqan gelinkaro. Waxa kaloo jira wax qabadyo farabadan, oo ay ka mid yihiin barnaamijka horumariinta waxbarasha shakhsiga ah. Qorshaha Waxbarashada Shaqsiga (IEP) ayaa la tixgelin karaa ka hor intaan loo gudbin (IPRC).

- Markaad laga yimaado aragtida waalidka guddiga aqoonsiga meelaynta iyo dib-u eegista "IPRC waxay abuurtaa waajibaadka guddiga iskuulku inay bixiyaan adeegyada-Qorshaha Waxbarashada Shaqsiga(IEP) la'aantood Guddiga aqoonsiga meelaynta iyo dib-u eegista(IPRC) waa balanqaad keliya wixii ay rajaynaayan in ay qabtaan – maahase waajib".
- Wallid ahaan, waxaad xaqa u leedahay in aad socodsiiyo howlaha adoo weydiisanaya iskuulka in aad la kulanka Guddiga aqoonsiga meelaynta iyo dib-u eegista (IPRC). Tan waxaa lagu sameeyaa qoraal ahaan. Waana wax ku caawin kara in lagu diyaariyo waraaqo ay kujirto qiimeyn cilmi nafs ah ama waraaqo kale oo dheeri ah (tusaale ahaan qiimeynta hadalka, warbixinta kaararkii hore iwm).
- Hadafka Guddiga aqoonsiga meelaynta iyo dib-u eegista (IPRC) tu waa in la qiimeeyo in ilmahaagu xaqa u leeyahay in loo aqoonsado inuu yahay arday u qalma wabarasada gaarka ah sida ku xusan qeexitaanka Wasaaradda Waxbarashada ee ardayda gaarka ah, iyo in la go'aamiyo meelaynta iyo ilaha ugu habboon ee wax looga qaban karo awoodaha iyo baahiyaha ilmahaaga ²

- Waalid ahaan waxaad xaqa u leedahay inaad ka soo qeyb gasho kulanka Guddiga aqoonsiga meelaynta iyo dib-u eegista (IPRC) halkaas oo lagaga wada hadli doono baahida ilmahaaga, iyo haddii aadan ka raali ahayn talooyinkoodaba, waxaad haysataa ikhtiyaar aad rafcaan ku qaadata. Waxaa si weyn lagula talinayaa in waalidiintu ay ka qeybgalaan shirarka Guddiga aqoonsiga meelaynta iyo dib-u eegista IPRC. Guddiga iskuulgaagu wuxuu hayaa macluumaad Waalidka haga oo ku saabsan habsami u socodka waxbarashada Gaarka ah, adeegyada iyo ilaha degmadooda. Xor baad u tahay inaad weydiisatid nuqul ka mid ah tilmaamaha aad u baahantay
- Guddiga aqoonsiga meelaynta iyo dib-u eegista IPRC waa hanaanka kaliya ee leh qaab rafcaan qaanuuneed haddii waalidku diido shaqaalaha go'aankooda.
- Waalidku waxay codsan karaan shir kooxeed ay la yeeshaan khubarada guddiga dugsiga si loo go'aamiyo taageerada ugu fiican ee ilmahooda. Guddiyada iskuulku waxay awoodaan inay helaan khibrado badan oo kala duwan oo ay ku caawiyaan ardayda caqabadaha xanuunka maskaxdu la soo darso, sida lataliyayaasha haga ma tilmaama, macalimiinta guusha u horseedi kara ardayda, la taliyayaasha waxbarashada gaarka ah, kuwa dhaqanka, kuwa bulshada, kuwa cilmi nafsiga, kuwa xanuunada maskaxda iyo kalkaaliyayaasha qabatinka, barayaasha adeegyada, kaaliyayaasha waxbarashada, iyo xirfadleyda waxbarashada gaarka ah.
- Guddiga aqoonsiga meelaynta iyo dib-u eegista (SEAB) waa gole ka kooban 3 qof oo dib u eegi doona go'aanka Guddiga aqoonsiga meelaynta iyo dib-u eegista (IPRC). Haddii aad go'aansato inaad bilowdo rafcaan, waxaa lagu weydiisan doonaa inaad magacawdo xubin guddiga racfaanka ka mid ah isla markiiba.
- Guddiga aqoonsiga meelaynta iyo dib-u eegista (IPRC) waxay dib-u-eegi doonaan macluumaadka la siiyay ee ku saabsan baahida ardayga oo waxay ku siin doonaan talooyin qoraal ah guddiga iskuulku. Keddibana guddiga iskuulka ayaa go'aanka gaadhidoonta bal inay aqbalaan ama diidaan talooyinka waxayna ogeysiin doonaan waalidiinta iyo ardayda ka waawayn 16ka go'aankooda.

Markay Adeegyada Iskuulka Caadiga ahi Aanay La Kulmin Baahida Ilmahaaga

Marka ardayda leh xanuunka maskaxda ay u baahan yihiin taageero ka badan tan iskuuladooda ama guddiga iskuulku ay bixin karaan, waxaa loo tixgalin karaa barnaamijka Daryeelka iyo Daaweynta, oo horey loogu yiqiin Daaweynta Maalintii

² Qorshe-hawleedka Iskuullada Ontaariyo ee loogu talagalay Carruurta leh Baahiyaha Gaar ah, Sebtember 2014 (Ontario School Roadmap for Children With Special Needs, September 2014)

ama Qeybta 23: fasal khaas ah oo leh taageero dheeri ah oo xanuunka maskaxda ah. Waxay bixiyaan waxbarasho shaqsiyeed oo si weyn loo taageeray, waqti cayiman iyo ujeeddada dib loogu dhexgalinayo ardayga fasalka caadiga ah markay ku habboon tahay. Barnaamijyada Daryeelka iyo Daaweynta ayaa ah qaab-dhismeedka fasalka guudahaan lagu bixiyo Qaybta 23 ee Sharciga Waxbarashada

- Ottawa, hayadada caafimaadka ee xanuunka maskaxda waxay iskaashi la leeyihiin guddiyada iskuullada ee la yidha (the McHugh Unit and Le Transit) si ay ugu shaqeeyaan fasallo daaweynta loogu talagaly oo ku dhexyaal iskuullada kala duwan ee degmooyinkooda. Tani waxay ku kala duwanaa kartaa degmo dugsiyeedka, markaa waa muhiim inaad la xidhiidho guddiga iskuula degmadaada ama aad tixraacdo boggooda internetka.
- Habka loo galo: Guddiga iskuullada Ottawa, maamulaha iskuulka ilmahaaga, isagoo la tashanaya waalidiinta, wuxuu isku soo dubaridaa soona gudbiyaa isagoo diyaarah arjiga barnaamijka Daryeelka iyo nidaamka Daaweynta ee loo soo bandhigayo guddiga Gudbinta isku xidhka isuduwayaasha. Guddiga Isuduwayaasha ayaa ah kuwo a udhaxeeya midawga waxbarashada iyo kuwa daaweynta. Guddigan waxaa ku jira aqoonyahannada xanuunada maskaxda ee carruurta oo go'aamiya sida ardaygu uga faa'iideysan karo fasalka daaweynta. Waalidku waxay u ogolaan karaan maamulaha ama xubin ka mid ah kooxda dhakhaatiirta maskaxda inay bilaabaan hawsha.
- Oggolaansho ayaa loo baahan yahay meel kasta oo codsigu ha ka yimaadee. Mar alla markii iskuulku u soo gudbiyo tala soo jeedin si dib loogu eego Isku-duwaha , guddiga dugsiya ma leh awood go'aan-qaadasho.

- Ujeeddada isku-duwuhu waa in la hubiyo in dadka ka wada howlgalayaa waxbarashada iyo daweyntu ay ka wada shaqeeyaan tixgelinta baahida ilmaha.
- Guddiga aqoonsiga meelaynta iyo dib-u eegista IPRC-du kuma tallin karaan Barnaamijka Daryeelka iyo Daaweynta. Guddiga aqoonsiga meelaynta iyo dib-u eegista IPRC iyo Barnaamijka Daryeelka iyo Daaweynta waa labo qaab oo kala duwan.
- Tijaabada cilmi-nafsiga ayaa looga baahanyahay habka isku xidhka Galitaanka iyo Gudbinta. Baadhitaanka waxaa sameyn karaa dhakhtarka cilmi-nafsiga ee ilmahaaga oo yaqaan, guddiga dugsiya ama iskuulka, xaaladaha qaarkood qoysku wuxuu dooran karaa inuu ku lug yeesho dhakhaatiirta ku takhasusay cilmi-nafsiga. Caymiska daryeelka daawooyinka ee shaqaalaha qaarkood ayaa bixiya kharashka. Awoodda, la dhaqanka bulsheed, shucuureed, iyo habdhaqanka, ayaa lagu qiimeyn karaa imtixaankan si loogu hago jawiga waxbarasho ee ugu fiican ardayga leh caqabadaha xanuunka maskaxda.
- Ardayda doonaysa in ay dhigata iskuullada ka baxsan Ottawa, waad wici kartaa xafiiska si aad u ogaatid nidaamka diiwaangelinta ilmahaaga si loogu meeleeeyo fasalka gaarka ah haddii loo baahdo.

waanu soo marnay,
waanu fahmaynaa,
wannan ku caawin karnaa.

Xirfadaha Aasaasiga ah ee loogu talagalay waalidiinta- PLEO's lix P's U doodista Iskuulka ee Wax ku oolka ah

1) Ku bahoobid ama shuraako:

- Waalid ahaan, waxaad haysataa faham khaas ah iyo macluumaad ku saabsan ubadkaaga. Waxaad tahay qareenka ugu wanaagsan ee ilmahaaga iyo qayb muhiim u ah kooxda ilmahaaga ku shaqada leh.
- U doodeyaasha waalidiinta ee firfircoon waxay ogaadaan qiimaha dhisida xidhidhada shaqada ee ixtiraamka leh ee kooxda iskuulka. Ka fikir sidii beer oo kale: marwalba ma goosan kartid, waxaadse u baahantahay inaad jilciso sidoo kale.
- La shaqee macallinka ilmahaaga si aad u wadaagtaan macluumaadka ku saabsan baahida ilmahaaga iyo sidoo kale qaababka aad adigu guriga ugu shaqeysid.
- Adeegsiga weedhaha sida, "waa aniga xuquuqdayda" waxay gudbin kartaa dhawaaq dagaal oo ka soo horjeedka wax-ka-beddelka oo si xun u saameyn kara xidhiidhka adiga ama ilmahaagu la wadaagaan kooxda iskuulka. Xuquuqdaada in aad fahamto ayaa muhiim ah, sida doorashada luuqad ka tarjumeysa rabitaankaaga.
- Ka soo qeybgal dhammaan kulamada iskuulka marka horumarka ilmahaaga, baahidiisa, awoodiisa iyo mustaqbalkiisa laga wada hadlayo. Waxaad u baahantay in codkaaga iyo fahamkaaga ku saabsan baahiyaha ilmahaag lagu muujiyo miiska go'aanka
- U furfuranow fikradahooda. Waqti u oggolow naftaada inaad ka fakarto talooyinka dugsiga ee kaa yaabiya intaadan si dhakhso ah u diidin. Sii naftaada 24 saacadood si aad uga fikirto ka hor intaadan jawaabin.
- Maskaxda ku hay in aad ixtiraamto kooxda iskuulka marka aad kala sheekaysaneysid ilmahaaga, dhib kasta oo aad dareento. Tani waxay ka caawin doontaa ilmahaagu inuu yeesho xirfadaha doodista muhiimka ah, oo ay kujirto sida si xushmad leh loogu doodo.
- Si tartiib-tartiib ah ugu lug yeelo ilmahaaga sida loogu doodomarka ugu horreysay ee suuragalka ah inta hawsha lagu jiro. Tani waxay u diyaarneysaa iyaga inay u doodaan nafsadooda sannadaha dambe ee iskuulka sare. Waxay noqon kartaa wax caawin kara in ilmahaagu hadafkiisuu si madax-bannaan ugu doodo, iyo taageeradaada, marka uu gaadho da'da 16.

2) Diyaargarawga

- Faham aasaaska sharciga waxbarashada gaarka ah iyo dariiqooyinka nidaamka adiga oo booqanaya websaydhka ama bogga internet ee Wasaaradda Waxbarashada.
- Ku bilow faylal in aad ku kaydiso dhammaan agabyada la xidhiidha waxbarashada ubadkaaga oo nidaamsan kana mid yihiin: natiijooyinka qiimaynta, Guddiga aqoonsiga meelaynta iyo dib-u eegista IPRCs / Nidaamka Waxabaasha Shakhsiga IEPs ee la soo dhaafay, u fududee shaqada iskuulka si loo caddeeyo, kaadhadhkaa warbixineed ee hore, iwm. Tani waxay kuu sahlidoontaa meel keliya in aad ka wada hesho waxkasta oo aad u baahantay si aad isugu diyaariso kulanka.
- Kula xidhiidh qoraal ahaan dhammaan iskuulada iyo cidwalba nuqul ka mida ahna kala hadh. Inaad wax qorato markaad joogto kulamada iskuulku waa wax muhiim ah keddibna waxaa lagu wareejiinkaraa
- e-mail si loogu diro xubnaha shaqaalaha hadday u baahdaan. Wadahadalka taleefooka sidoo kale waa la qori karaa markaad dhamaysana e-mail kooban ayaa lagu diraa ado xaqiijinaaya qodobbada muhiimka ah. Kuwani waxay noqon karaan tixraac qiimo leh hadhow haddii loo baahdo. Haddiise aan la qorin, ma noqondoonaan wax jir.
- "Ku celceli shucuurtaada"³.
- Soo kaxayso qof kaa taageera kulamada dugsiga, oo hore u sii ogeysii iskuulka. Joogitaanka qofkaasi waxay ku siin kartaa taageero niyadeed iyo walaacaa oo kaa yaraad. Waxay kaloo kaa caawin kartaan xagga qoraalada.

3) Xushmaynta:

- Ula dhaqan dadka kale si xushmad leh xagga xidhiidhka xitaa haddii khilaaf jiro. Hadalada xunxun ama cadaawadda leh oo aad tidhaahda waxay ka hor imanayaan xaaladahaag.
- Marwalba kaalay wakhtiga lagu qabtay, ama ka soo horee marka shir jiro, dib u dhacana iska ilaali
- Isku day inaad u xalliso dhibaatooyinka heerka ugu wanaagsan ee suurto galka ah marka hore. Inta badan caqabadaha maalinlaha ah waxaa xallin kara macallinka ilmahaaga. Si kastaba ha noqotee, waligaa ha ka walaacin marka ay lagamamaarmaanka tahay inaad rafcaan u dirto hay'adda sare marka loo baahdo adoo adeegsanaya nidaamka kala dambaynta oo sidan u kala horeeya. Macalin- Maamullaha – Kormeeraha iskuulka / Kormeeraha Guud ee Tacliinta Gaarka ah
- Xasuusnow inaad u mahadceliso oo aad garowsato adiga ama ilmahaagaba cidii indin caawisa.

4) Xirfad-yahan:

- Isdaji. Danta qoskaaga ayaa ku jirta inaad shucuurtada iyo aqoontaadaba xakameeyso . Tani waa waxyaabaha ugu adag ee la sameeyo, laakiin ugu dambayn, waa ta ugu muhiimsan. Waan ognahay in tani ay tahay geedi socod qiiri leh, shucuurtaasna waa in loo muujiyaa, ra'yi ahaan ka hor iyo ka dibba shirarka lala yeesho qof ka tirsan shabakaddaada taageerada - oo ay ku jiraan PLEO.
- "Iga caawi in aan fahmo sida aan u taageerno ardaygan" waa codadka ugu wax soo saar badan kulamada kooxda.
- Marka aad samaysato liis qodobbada aad jeceshahay in aad ka hadashaa ay ku qoranyihiin marka laga hadlayo kulammada waxay gacan ka geysan doontaa hubinta in aanad waxba ilaawin.
- Tixraac hadda qiimeynta maskaxda ama cudurka. Kaliya maaha aragtida waalidka inay jiraan caqabado xanuunka maskaxda ahi. Waxaa la waafajinayaa waraaqaha sharci ee ay soo saareen khabiirada caafimaadka.
- U tixraac arrimaha gaarka ah iyo kuwa guusha si sax ah maalin kasta. Tani waxay lagamamaarmaan ka dhigaysaa ama u jidaynaysaa waalidiinta inay duubaan dhacdooyinka maalin kasta ee ku saabsan caqabadaha iyo guulaha uu ilmuhu la kulmaayo.
- Weydiiso in la guu sharraxo erayga aanad hubin ama aad u baahan tahay in lagu fahamsiiyo waxa laga doodaayo. Gaarna kuuma aha adiga. Waxaad gaadhi kartaa oo keliya go'aamo wargelin ah iyo inaad ka qaybqaadato haddii aad fahamto. Waxa kaloo ku caawin kara inaad qorto waxaad u maleysay inaad maqashay kedibna aad xaqiijiso in waxa aad qortay ay sax yihiin.

5) Joogto:

- Ku adkayo codsiyadaada.
- Si cad uga warhay dhammadka shirarka si aad u ogaato tillaabooyinka xiga iyo sidoo kale magaca qofka mas'uulka ka noqonaaya . Hadday suurtoagal tahay, xaqiiji qiyaastii wakhtiga uu dhamaanaayo.
- La soco haddii talaabooyinka xiga aan la dhameystirin. Ha uga tegin ugu dambayn si fudud . Qiyaas oo hubi wakhtiga waqtiga laga filayo adeegga, iyo heerkaba.

6) Ujeedo :

- Soo kaxayso qof kaa taageera kulamada iskuulka, iskuulkana sii ogeysii. Joogitaanka qofkaasi kula joogana waxay ku siin kartaa taageero niyadeed waxayna yareynaysa walaacaa. Waxa kale oo qofkaasi kaa caawin kartaa xagga qoralalka.

- Caruurteenu way eegayaan waanay baranayaa, habka wax loo hogaamiyo iyagoo inaga dhiganaaya tusaale ay ku daydaan sidii ay ugu doodi lahaayeen naftooda una dhisilahaayeen , ee aanay u dumiyeen mustaqbalka, taas oo u noqon doonta xirfad nololeed oo muhiim u ah noloshooda.
- Diiradda saar himiladaada fog: Muxuu yahay bartilmaameedka ilmahaagu? Maxay yihiin yoolalka ilmahaagu ? Tusaale ahaan. Ma si ay u noqdaan dad qaangaadh ah oo guuleysta oo haysta shaqo buuxda oo ay jecel yihiin? Ma Inay shaqo ka hesho ku saabsan sayniska maxaa yeelay waxay jeceshahay sayniska? Ma si ay u noqdaan qof madaxbannaan oo keli noolaan karan? Samee sawir ama aragti ilmahaagu ku guulaysan karo oo macquul ah. Waalidkasta ilmahoodu waxyar ayuu ka duwanaa doona. Diiradda ku hay tan sida natiijada safka kama dambasta ah kuna sababee aakhirka hadafkaaga qorshayaasha kugu xeeran.
- Ogaanshaha himilada ugu dambaysa ee aan u leenahay ilmaheennu waxay inaga caawineysaa inaan ka warqabno meelaha u baahan in ayanu awooda saaro iyo kuwa aan sidaa muhiimka u sii ahayn. Haddii waalidku waxwalba ku doodo waxay yaraynaysaa dadaalkaaga iyo waxtarkaaba dhanwayba.
- La wadaag yoolka iyo himiladaada iyo tan ilmahaaga kooxda si qof walba uu u ogaado awoodna u yeesho inuu u shaqeeyo sidii loogu talagalay. soo bandhig aragtidan. Kana iibi dadka kale. Keen goobta si ay u caawiso ilmaha siduu u gaadhilahaa ama ugu jihaaysanlahaa himiladiisa

Xuquuqda gaarka ah

- Markay ardaydu iskuulka joogaan ee ayla kulmaan astaamaha xanuunnada dhimirka, waa muhiim in xuquuqdooda la ilaaliyo lana daryeelo waxaana loola dhaqmayaa si xushmad iyo sharaf leh.
- Xuquuqda ardayga ee asturnaanta waxaa sifiican ugu adeegaya waalidka u faham sida ugu wanaagsan ee macluumaadka lala wadaago iskuulka. In kasta oo macluumaadka iskuulkain lagu saleeyaa (sida kaadhahka warbixinta, IEPs, iwm.) Ay qasab tahay oo lagu qoro Diiwaanka Ardeyda Ontario (OSR), noocyada kale ee macluumaad ee la xidhiidha xanuunka maskaxda ee ardayga (sida qiimeynta, daaweynta iyo siideynta) waa lala wadaagi karaa. shaqaalaha iskuulka si loo caawiyo oo loo taageero ilmaha, laakiin laga ilaaliyo Diiwaanka Ardeyda Ontario (OSR),. Waa wax iska jira in waalidku si hoose u waydiisto sidii mari oogu helilahaa diiwaankaas.

- In kasta oo ardaygu xaq u leeyahay in la asturo, iskuuladu ma noqon karaan kuwo kaalmeeya ilaa waalidku raali ka noqdaan inay la wadaago macluumaadka si loo fahamo awooda shaqsiyadeed ee ilmaha iyo baahidiisa. Wadashaqeynta ka dhaxaysa qoysaska iyo iskuulada ayaa taageerooyinka waxbarasho ee ilmahaaga, macluumaadka ugu wanaagsan, jawi niyad iyo daryeel loo wada dhanyahay, iyo ixtiraamku ku salaysanyahay .

Muddada hakhtarka lagu jiro

- Marka ardayda isbitaal loo dhigo si looga daweeyo xanuunka maskaxda, waxay ka qeybqaadan karaan waxbarashadooda wakhti kooba maalin kasta ah. Dugsiga caadiga ah ee ardayga ayaa lala soo hadli doonaa waalidka ama ilmaha haddii oggolaansho laga helo, macallinka dhakhtarku wuxuu la shaqeyn doono ardaygu isagoo isbitaalka ku jira, markay habboon tahay.
- Waxay gacan ka geysan doontaa kobcinta iskaashiga haddii waalidku tixgeliyaan martiqaadka wakiillada dugsiga ama Kalkaaliyayaasha Caafimaadka ee Maskaxda iyo Caadaysiga Maandooriyaha (MHAN) oo iyagu ay ka talobixiyaan shirarka qorsheeyaan. La wadaagga qorshaha talobixinta iskuulku markasta waxay ku xidhan tahay waalidka ama ilmaha ay da'diisu ka weyntahay 12, laakiin markii qaybaha waxbarashadda iyo daaweyntaba si wanaagsan loo wargeliyo waxaa ka faa'iidayaan kartaa qof walba. Si kastaba ha noqotee, haddii waalidku ama ilmuhu diido inuu la wadaago waxyaabaha aynu soo sheegnay, shaqaalaha iskuulku waxay ku dadaalayaan inay sii wadaan taageeraan ardayga.
- Mid ka mid ah walbahaarka ardayda ku soo laabaneysa iskuulka kadib muddo marka dhakhtarka ku jiraan waa sida loogu sharaxo maqnaanshaha asxaabtooda kale. Waxaa lagula talinayaa ardayda inay ka sii tabaabushaystaan oo xitaa ku celceliyaan waxay sheegi doonaan iyo cidda ka horreysa. Shaqaalaha bulshada u adeega ama Kalkaaliyayaasha xanuunka Maskaxda iyo Maandooriyaha ayaa gacan ka geysan kara ardayga ku laabanaaya iskuulka oo diyaariya waxayna gacan ka geysan karaan sameynta taageero joogto ah. Waxaad ka codsan kartaa ururrada xanuunka dhimirka, maamulaha, ama kooxda warbixitaanka isbitaalka hadba sida ay hawsha u wadaan, ama soo lasoo hadal PLEO si aad u ogaatid fursadaha kugu saabsan ee degmadaada.

Muddo dheer ka maqnaanshaha iskuulka

- Haddi aanu ilmahaagu iskuul dhigan, haddu baadhitaan jiro iyo haddii kaleba , la xidhiidh iskuulka degmadaada. Waxay leeyihiin shaqaale bulshada u adeega iyo xirfadlayaal kale oo gacan ka geysan doona helitaanka agabyada saxda ah ee ku taageeri kara ilmahaaga waxbarashadiisa. Waxaa jira fursado kale oo aad wax ka ogan karto.
- La socodsii marwalba dhaqtarkaaga qoyska maqnaanshaha badan ee iskuulka ilmahaaga

Iskuullo kale

- Barnaamijyada kala duwani waxay ardayda siiyaan fursado ay kula kulmaan himilooyinka Wasaaradda oo u dabacsan si loogu oggolaado waa in si weyn looga fiirsado dhinacyada ay danahooda gaarka ah iyo kartidooduba ku jiraan, sidoo kale in diiradda la saaro fursadaha barashada ee khibradaha. La xidhiidh guddiga iskuulka degmadaada wixii faahfaahin ah kana wada hadal baahiyaha gaarka ah ee ilmahaaga, iyo haddii barnaamijku ku habboonyahay baahiyahooda
- Qaybta labaad ee barnaamijyada kala duwan waxay bixiyaan jawi waxbarasho oo loogu talagalay ardayda inay ku dhammaystiraan hal koorso markiiba. Waxay bixiyaan jadwal dabacsan, fursadaha goobta shaqada, fasalo yar yar, waxbarasho isku dheeli tiran. Tixgalinta ikhtiyaarkan, hubinta in shuruudaha barnaamijku ay ku habboon yihiin ilmaha. La xidhiidh guddiga dugsigaaga wixii faahfaahin dheeraad ah.



- Meelaynta Fasalka Gaarka ah waa fasallo ku dhex yaal guddiyada iskuullada deegaanadiina oo laga heli karo in loo maro nidaamka Guddiga aqoonsiga meelaynta iyo dib-u eegista (IPRC). Waad weydiin kartaa kulanka Guddiga aqoonsiga meelaynta iyo dib-u eegista IPRC-da waxa xulashooyinka ay yihiin iyo haddii ilmahaagu u qalmi meeleyntooda.
- Dugisiga sare ee Dadka Waaweyn waa dugsi sare oo waqti buuxa shaqeeya oo loogu talagalay dhalinyarada ka waaweyn 18 jirka. Mar labaad, waxaa muhiim ah in la taageero ardayga lana kulmo maamulaha si ay isula jaan-qaadaan iyagoo eegaya waxa ku habboon baahiyaha ardayga iyo xeerarka dugsiiga ama iskuulkaba
- Maadadaha khadka internetka tooska ah ayaa laga heli karaa oo si buuxda ayey u aqoonsan tahay Wasaaradda Waxbarashada Ontario, taasoo u oggolaaneysa ardayda inay helaan dhibcaha dugsiiga sare. Waxaa jiri kara kharash ku baxa koorsooyinka. In xidhiidh PLEO wixii faahfaahin dheeraad ah ee ku saabsan doorashada iyo inaad barbar dhigto baahida ilmahaaga,
- Iskaashiga waxbarashada (Co-op) / Barnaamijka Tababbarka wuxuu ardayda siiyaa fursad ay ku kasbadaan dhibcaha iskuulka sare ilaa dhammaystirka, waxay bixiyaan shaqooyin qarkood aanay la hayn wax mushahar ah halka qarkood ay mushahar bixiyaan. Barnaamijyadan waxaa laga heli karaa dugsiiga sare ee deegaankaaga ama kuwa internetka
- Dugsiyada hoose iyo dugsiyada sare ee gaarka loo leeyahay ayaa laga heli karaa takhasuska waxbarashada naafanimada iyo / ama xanuunka dhimirka (maskaxda). Iskuuladan ayaa ah adeeg lacag la aan ah. La xidhiidh PLEO si aad u ogaato waxyaabaha loo baahanyahay.
- Barnaamijyada guryaha lagu barto ayaa laga heli karaa iyada oo loo xulanaayo hab iyo siyaabo kala duwan

Waxbarashada sare kadib

- Xarumaha Naafada: Kulliyadaha iyo jaamacadaha Ontaariyo badankoodu waxay bixiyaan adeegyo gaar u ah ardayda naafada ah, oo ay ka mid yihiin xanuunada madaxu. Si loo galo machad walbaa wuxuu leeyahay barnaamijyo u gaar ah iyo shuruudo lagu helo adeegyadooda
- Xaaladda Ardayga Qaangaarka ah: Haddii qofka dhalinta yar aanu dhammeyn dugsiiga sare, oo uu jiro 19 sano ama ka weyn yahay, isaga / iyadu waxay ikhtiyaar u leeyihiin inay codsadaan gelitaanka jaamacad ama kulliyad sidii arday qaangaadh ah. Tixraac hay'adaha aad rabto si aad u hesho macluumaad dheeraad ah oo ku saabsan habka loo maro.

Waa fikirka kama dambaysta ah ee waalidiinta

Waxaa jiri kara hal shay oo ku saabsan koriinka ilmahaaga markii xanuunka maskaxda laga hadlaayo waa inuu noqdo mudnaata koowaad kedibna waxbarashadu ay ku meelgaadh tahay oo kursiga dambe kuu taal. In la riixo waxbarashadda markii ilmuhu aanu awood u yeelan inuu diirada saaro, ama marka culeysyada kale ay badan yihiin, waxay noqon karaan in aan wax faa'iido ah laga gaadhin. Akhbaarta wanaagsan ayaa ah, iyada oo taageero munaasib ah laga helo waalidiinta, adeegyasha xanuunka dhimirka, iyo nidaamka waxbarashada, ardaygu waxay ku noqon karaan waxbarashadiisa wakhti kasta

Xogo dheeraada

- Shabakadda guddiga iskuulkiina
- Shabakadda Wasaaradda Waxbarashada Ontario – oo ay ka mid tahay sharraxaadda buuxda ee Xeerka 181/98 ama loo yaqaan Waxbarashada Gaarka ah
- Isu-duwaha Caruurta Ottawa iyo Adeegyada Shaqo ee ay Helaan
- Ururka Waxbarasha ee Naafada Ontario iyo Ururka Waxbarashada Naafada ee Ottawa-Carleton

Goraalada:

Khasab kuguma aha inaad kaligaa sameyso.

Nala soo xiriir si aad u hesho macluumaad dheeraad ah
ama si aad ugala hadasho xaaladdaada gaarka ah.

**Caawimaada la siinayo
waalidiinta caruurta ay
haysato caqabadaha la
"xiriirta caafimaadka
dhimirku waxay u sahashaa
inay hore u socdaan**